

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Nofeembar 2023 ayaa gaaray 144.92, marka la barbardhigo 143.59 bishii Oktoobar 2023.

Isbedel bileedka, Nofeembar 2023, marka la barbar dhigo Oktoobar 2023, ayaa sare u kacay 0.92 boqolkiiba. Sare kaca ugu badan ayaa ahaa qiimaha **Cuntada iyo Cabitaanada** 2.94 boqolkiiba **Maqaayadaha iyo Hotelada** oo ayaguna gaaray 3.20 boqolkiiba. cimilada oo aan wanaagsanayn awgeed ayaa wax soo saarkii cuntadu hoos u dhacay, taas oo sababtay in qiimaha cuntada qaybaheed kala duwani sare u kaco. (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Nofeembar 2022 iyo Nofeembar 2023 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 7.06 boqolkiiba, marka la barbardhigo 6.21 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Oktoobar 2022 iyo Oktoobar 2023.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Nofeembar 2023 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Nofeembar 2023	
Tusaha bishan (Nofeembar 2023)	144.92
Tusaha bishii hore (Oktoobar 2023)	143.59
Tusaha sanadkii hore (Nofeembar 2022)	135.37
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	0.92%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	7.06%

Heerka sicirbararka marka loo eego TSB-da

isbedelka boqolayda ee 12 bilood

Tixraaca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



isha xogta NBS

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Nofeembar 2023

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Nofeembar 2023

Heerka sicir-bararka bisha Nofeembar 2023 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Nofeembar 2022 iyo Nofeembar 2023.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 7.06 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Nofeembar 2022 iyo Nofeembar 2023, marka labar bardhigo 6.21 boqolkiiba 12kii bilood, Oktoobar 2022 iyo Oktoobar 2023.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Nofeembar 2023 ayaa sameeyey sare u kac dhan 0.92 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Nofeembar 2023.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 2,94 boqolkiiba, bishii Nofeembar 2023 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya -1.62 boqolkiiba bishii Oktoobar 2023. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu hoos u dhaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -1.76 boqolkiiba bishii Nofeembar 2023. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -5.19 boqolkiiba Oktoobar 2023.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sameeyey hoos u dhac bille ah oo gaaraya -2.50 boqolkiiba Nofeembar 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 18.05 boqolkiiba Nofeembar 2023. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo ahaa 21.07 boqolkiiba ee Oktoobar 2023.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




ishaxogta NBS

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Nofeembar 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):


- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 61.87 boqolkiiba bishii Nofeembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+94.60 boqolkiiba).
- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 51.06 boqolkiib bishii Nofeembar 2023. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka (Miiraha ah) (+ 96.97 boqolkiiba).
- **Kirada guryaha, Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 18.05 boqolkiiba bishii Nofeembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada & Gaaska (+17.63 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 13,83 boqolkiiba Nofeembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+16.10 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka Raga (+34.40 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 12.57 boqolkiiba bishii Nofeembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Adeega Gaadiidka (+32.70 boqolkiiba). Sare u kaca waxaa sababay qiimaha rakabka gawarida dhulka (+49.21 boqolkiiba)
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 9.40 boqolkiiba Nofeembar 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+10.42 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 7.82 boqolkiiba Nofeembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+13.79 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.18 boqolkiiba Nofeembar 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu dhigto dugsiga sare oo u gaaray (+28.26 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 6.84 boqolkiiba, bishii Nofeembar 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+22.71 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 3.20 boqolkiiba bishii Nofeembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+4.97 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Nofeembar 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Nofeembar.

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Nofeembar 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Nofeembar 2023 (+)

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac bille ah 3.58 boqolkiiba bishii Nofeembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+4.60 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac bille ah oo gaaray 3.20 boqolkiiba bishii Nofeembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+4.97 boqolkiiba).

Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sameeyey hoos u dhac bille ah oo gaaraya -2.50 boqolkiiba bishii Nofeembar 2023. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada, Gaaska iyo shidaalka kale (-5.87 boqolkiiba).

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Nofeembar 2023 ee habka (COICOP)

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Nofeembar 2022 TSB	Oktoobar 2023 TSB	Nofeembar 2023 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha Tsb	100.00	135.37	143.59	144.92	0.92	7.06
Cuntada & Cabitaanada	46.04	147.14	140.43	144.56	2.94	-1.76
Tubaakadda	1.25	111.66	167.33	168.67	0.80	51.06
Dharka & Kabaha	5.03	148.93	169.52	169.52	0.00	13.83
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	122.28	148.05	144.35	-2.50	18.05
Agabka Guryaha	2.93	109.53	117.61	118.10	0.41	7.82
Caafimaadka	5.00	171.08	182.78	182.78	0.00	6.84
Gaadiidka	3.77	108.42	121.85	122.04	0.16	12.57
Isgaarsiinta	2.80	103.03	161.02	166.78	3.58	61.87
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	103.85	104.30	104.30	0.00	0.43
Tacliinta	4.00	109.11	116.95	116.95	0.00	7.18
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	145.78	145.78	150.45	3.20	3.20
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	110.27	120.52	120.63	0.09	9.40

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Diseembar, 2023 waxaa la baahin doonaa 15 Janaayo, 2024. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistikada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Nofeembar 2023 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qaybaha TSB-da

Qeybaha ka qaybqaata % heerka sicirbararka (COICOP)



isha xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia